



# GUUSHA DUGSIGU WAXAY KA BILAABANTAA IMAANSHAHA DUGSIGA

Maxaa dhacaya marka uu ardeygu ka maqnaado dugsiga hal maalin, sabab kasta ha ku maqnaadee?



- ✓ Ardeygu waa inuu maalinta xigta ee uu dugsiga imanayo shaqada uu qabanayo laban laabaa si uu ula qabsado warbixinda uu ka maqnaa iyo shaqada-guriga ee ardeyda loo soo direyba. Waaxda Waxbarashada ee dalka Maraykanhu waxay tibaaxday in maalin kasta oo dugsiga laga maqnaado ay ardeyga ku qaadaneyso laba maalmood si uu ula qabsado casharadii dhaafay.
- ✓ Macallinku wuxuu lumineyaa wakhtigiisa marka uu hal ardey wax u dhigeyo taas oo ah wax ardeyda fasalka oo dhan loo dhigey, waxayna saameynaysaa qorshe u sameynta casharka ee maalinta xigta. Tanu waxay saameynaysaa fasalka oo dhan, maaha ardeygii maqnaa oo keliya. Hada bal waxaad intaas ku dhufataa fasal ka kooban 30 ardey sannadka oo dhan, xaataa waxay saameynaysaa ardeydii buundooyinka sare keeni jirey.
- ✓ Dugsigu wuxuu waayeyaa miisaaniyadii uu heli jirey, oo u dhexeysa \$30 ilaa iyo \$50, taas oo hadba ku xidhan waxbarashada degmada. Taasu waxay saameynaysaa awooda dhaqaale ee qalabka loogu soo gadi lahaa fasalada, sida buugta wax laga barto iyo qalabka koombiyuutarada lagu isticmaalo. Waxaad taas ku dhufataa 500 oo ardey, taasi waxay keenaysaa faraqa ah in dad la shaqaaleeyo, ama shaqaale la eryo, iibsashada qalab cusub, ama maaligelinta barnaamij cusub. Maqnaanshaha ay ardeydu dugsiga ka maqnaatey ee San Diego Unified School District (SDUSD) sannad-dugsiyeedkii '05-06 waxay degmada ku kacday in ka yar \$31 malyan oo ah dakhligii ay heli lahayd.
- ✓ Jaaliyadu waxay waayeyso macluumaad qiimo badan oo kharash badan ku fadhiya. Ardeyda dugsiyada iskaga tegta waxay jaaliyadeenna ka lumineyaa wakhti badan iyo malaayiin doolar ah taas oo adeegyada dadka loogu kabayo sida dembiyada, la-talinta iyo maandooriyaasha.

Dikoomentigan waxaa lagu soo daabacay kaalmada laga helay ururka Annie E. Casey Foundation Grant.

Wxii warbixin dheeraad ah ee ku saabsan siyaabaha aad ilmahaaga dugsigu ugu hayn lahayd, waxaad kala soo xidhiidhaa:

**Jennie Breister**

Iskuduwaha Lacagaha Deeqaha ah

Annie E. Casey Foundation

Communications Department

San Diego Unified School District

619-725-5598 or [jbreister@sandi.net](mailto:jbreister@sandi.net)